**FAAFINTA** **RASMIGA**

الجريدة الرسمية

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**

لولاية ارض بونت الصومال

**Sanadka 11-aad. Garowe 18. February 2009** **Lam. 2**

**Faafinta bil walba soo baxda** جريدةالشهرية

***Qeybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland***

Qiimuhu waa Sh.So 10.000 walba rukunka sanadkii waa Sh.So 170.000 dalka gudihiisa dibada Sh.So 500.000 rukunka la waydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3.000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wassaaradda maaliyadda.

---

# TUSMADA

**Qeybta Koowaad**

**Sharci**

**Ansixinta Barnaamijka Xukuumada DGPL 2009 -2012**

**Qeybta labaad**

**Xeer**

**Waxba maleh**

**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

**Waxba maleh**

***Sharci Lr. 1. ee 18/02/2009, kuna saabsan Barnaamijka DGPL 2009-2012.***

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOMALIYA

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

Xafiiska Madaxweynaha

Office of the President

**Sharci Lr.1 ee 18/02/2009, kuna saabsan Sharciga Barnaamijka DGPL 2009-2012**

**Madaxweynuhu**

| | | |
|---|---|---|
| Markuu arkay | : | **Dastuurka DGPl qodobkiisa 55-aad** |
| Markuu arkay | : | **Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Sumad XGGW/DGPL/014/2009 ee 01/02/2009.** |
| Tixgaliyeyna | : | **Ansixinta Golaha ee Ku cad warqada Lr.014 ee 01/02/2009 ay sharci ahaan ansax noqotay.** |

**Wuxuu soo saaray**

**Sharcigan soo socda:-**

**Qodobka 1-aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Sharciga Barnaamijka DGPL ee 2009-2012

**Qodobka 2-aad**

Nuqulada asalka waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, kan garyaqaanka guud iyo kan xog-hayaha Golaha Wakiilada.

**Qodobka 3-aad**

Dhaqan galka sharcigani wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga bilaabo maalintuu faafinta rasmiga ah ee dawlada ku soo baxay, kaasoo kamid noqonaya shuruucda dawlada, cid kastana ay waajib ku tahay inuu dhowro kuna dhaqmo.

**Wabilaahi Towfiiq**

**Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud (Faroole)**
**Madaxweyaha Dowlad Goboleedka Puntland**

00

**DAWLAD G. PUNTLAND EE SOOMAALIYA** | **PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

**Golaha Wakiillada** | **Representative Council**

**Xafiiska Guddoomiyaha**

---

*Ref*:- <u>XGGW/DGPL/ 14 /2009</u> **Date:- <u>01/02/2009</u>**

**Ku:- Madaxweynaha DGPL** **Garoowe**

**Ujeeddo:- <u>Ansixinta Barnaamijka Xukuumadda DGPL 2009-2012</u>**

***Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu:-***

MARKUU ARKAY:- Dastuurka DGPL Qodobkiisa 47-aad

MARKUU ARKAY:- Soo jeedinta Madaxweynaha DGPL

MARKUU ARKAY:- Baahida loo qabo in la ansixiyo Barnaamijka Xukuummada DGPL **2009-2012.**

MARKUU DHEGAYSTAY:- Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada

**Wuxuu Guddoomiyey**

Ansixinta Barnaamijka Xukuumadda DGPL 2009-2012

***Allaa Mahad Leh***

***C/rashiid Maxamed Xirsi***
***Gudoomiyaha Golaha Wakiillada DGPL***

GOLAHA WAKIILADDA EE DGPL PUNTLAND REPRESENTATIVE COUNCIL

①

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

PUNTLAND STATE OF
SOMALIA
OFFICE OF THE
PRESIDENT

# Barnamijka Xukumadda DGPL 2009-2012
# Golaha Wakiillada Dawlad Goboleedka Puntland
# Garowe, 28 January, 2009

## HORDHAC:

**Mudane Gudoomiye, Mudanayaal iyo Marwooyin:**

**Asallaamu Calaykum Wa Raxmatu Allahi Wabarakaatuhu,**

**Gudoomiye, sida aan ka wada warqabnno waxaa 1998-dii la dhisay Dawlad Goboleedka Puntland oo ay ku bahoobeen 5 Gobol iyo Deegaanka Buuhoodle (Bari, Sanaag, Nugaal, Sool, Mudug iyo Degaanka Buhoodle). Arintaaas waxaa keenay baahi loo qabey qaab dhismeed cusub oo matalikara masiirka bulshadeena. Qab dhismeedkaas ayaa markii ugu horreysay la taaba geliyay, iyadoo la adeegsanyo habraaca dhaqanka oo lagu dheehay waayaha siyaasadeed ee Soomaaliya. Waxaa lama huraan noqotay in lala jaan qaado wacyigii xilligaas jiray, iyadoo la doonayo in aayaha iyo masiirka dadka reer Puntlnad meel lagu ogaado, si ay u helaan maamul tayo leh oo suga amniga, una horseeda ummadda horumar dhaqan-dhaqaale (socio-economic development).**
**Dhismaha DGPL wuxuu kale oo ahaa qaab-dib-u-heshiisiineed ee loo yaqaan hoos-ka-dhis kor-u-dhis, una horseedi kara deegaamada kala ee Somaliya inay dhistaan maamul goboledyo kan oo kale ah, taasoo noqota qaabka keliya oo Somali la isugu kenikaro Nidaamka Federaaliga oo Dawlad Dhexe oo midaysan lagu gaari karo. Aakhiritaanki, fikrigan nadiifka ah waxaa la isaga raacay shirkii di-u-heshiisiineed ee Kenya, 2002-2004, oo beesha caalamka hormuud ka aheyd, ummada Somaliyedna aqoonsatay.**

Miradhalka himiladaas waxaa tusaale u noqday doorashoyinka demoqaradiga ahaa ee dhowaan ka dhacay Puntland, laguna soo doortay Madaxweyne iyo Madaxweyne-ku-xigeen 08/01/2009.

Dorashadaas waxay masuuliyad culus dusha u saartay heyadaha dawliga ah ee Puntland ayna ugu horreyaan Xukummadda iyo Golaha Wakillada cusub oo laga sugayo is-beddel dhab ah oo lagu higsado himilooyinka mustaqbalka ee dadkeenna, una horseedi kara amni, xasilloni siyaasadeed iyo horumar dhaqaale.

Sidaas darteed, waxaa loo baahanyahay inaan wada aqoonsanno in Xukumadda iyo Golaha Wakiillada ay maanta horyaalin caqabado waaweyn oo dhinac kasta ah, xag siyasadeed (DFKMG), amniga, dhaqaalaha iyo bulshadaba. Waxa aan qarsoonayn xaaladda dhabta ah ee jirta.

Haddaba, waxaa la inoo ka baahan yahay – Xukumad, GW iyo shacaba, inaan u wada howlgalno sidii aynu uga gudbi lahayn marxaladdan adag uguna talaabsan lahayn waddada horumarka.
Hadafka aan higsaneynana laguma gaari karo si sahal ah, Sidaas darted, waxaa kuligeen laynoo ka baahan yahay in aan qaadano go'aamo ad-adag oo muhiim u ah hurumarka shacabka Puntland. Taasi waa lagama maarmaan, mar hadaan dooneyno in aan la nimaadno is bedel dhab ah oo ka turjumaya himilooyinka aan higsaneyno.

Qorshaha guud ee xukumaddu wuxuu taabandoona dhinacyada kala duwaan ee nolosha-siyasadeed, amni, dhaqaale , bulsho iyo ilaalinta deganka, dadkeena iyo dalkeena.

## SIYAASADDA GUUD

### 1. GOLAHA XUKUUMADDA

Waxaa si rasmi loo magacaabay 18 wasiir, 23 Wasiir-ku-xigeen iyo 2 Waasiir Dawlo taasoo jirta ayaa hadan waxaa Golaha Xukuumadda ka bannaan jagooyin aan weli la magaacaabin, dhakhsana loo soo buuxin doona markii la helo dadkii ku haboonaa, haddii Alle Idmo.

Xukuumadu waa garowsan tahay dareenka shacabak Puntland ee ku aadan tirada xukuumada. Waxaa tirada xukuumada sababay duruufo badan iyo wacyiga lagu sugan yahay. Sidoo kale waxaa sababay in wasaarado isa saarnaa la kala qaaday, sida xanaanada xoolaha, beeraha iyo daaqa iyo daryeelka deegaanka oo u baahan wasaarado gooni ah si hawl dhab ah loo qabto.

Dhanka kale, Xukuumadan aan soo dhisay ma ay wada gaari karto deegaamada iyo beelaha dhammaantood, laakiin waxay daaweysay wax tirsasho badan oo horay u jirtay.

Xukuumadan waxqabadkeedu wuxuu noqondoonaa mid muuqda oo lala xisaabtamo. Waxay xukuumaddu tix gelinaysaa kala madax banaanida iyo wada shaqaynta hay'adaha dawladda sida, Golaha Wakiiladda, Golaha Xukuumadda iyo Golaha Garsoorka. Waxaa ka hawlgeli doona dad aqoon, waayo aragnimo iyo karti u leh maamulidda iyo hogaamintа hay'adaha dawliga ah (Government Institutions).

Hay'aduhu waxay ku hawl galayaan waajibaad shaqo oo qeexan (Job description). Ku waasoo la tilmaami doono qaabka wada shaqaynta iyaga iyo hay'adaha kale oo ay isku ujeedada yihiin, sida garsoorka iyo ammniga, hay'adaha adeegga bulshada, hay'adaha waxa soo saarka iyo dakhliga IWM.

Waa muhiim in aan leenahay siyaasad qorshaysan oo ka tarjumi karta danta gaarka u ah shacabka reer Puntland, midda guud ee Somaliya, xiriirka caalamiga ah iyo xiriir wanaagsan oo aan la yeelano dawladaha deriska ah.

Xukuumadu waxaa ay dardar gelineysaa gedi-socodka demoqradiya oo ay ugu horeyso dhameystirka Dastuurka cusub oo ka tarjumidoona danta shacabkeena, aftina loo qaado 18 bilood gudohood, haddi Alle idmo.

Waxaa kale oo ammuurtaas barbar socondoona in la qoro ugu horreyntii xerka axsaabta badan, furitanka axsaabta, magacaabidda guddiga doorashooyinka iyo dejinta xeerka dorashada (electoral commission and electoral law), taas oo loola jeedo dardar gelinta hanaanka geedi socodka dimuqoraadiyadda (Democratization Process). Taasi waxaa ay Puntland u horseedaysaa, Ilaah idankiis, in laga gudbo nidaamka qabaliga ah ee toban jirsaday, kaas oo sababay caqabado badan oo qaarkood la dhaafi

kari waayey iyo in lagu tallaabsado nabad buuxda, horumar iyo iskaashi buuxa ee dhinacayada kala duwan.

Xagga siyasadda ku wajahan Qaran Somaliyeed, xukuumada Puntland waxay ilaalineysaa nidaamka fedaralka oo ah mid reer Puntland hore u go'aansadeen, sidaasna saldhig ugu noqday xukuumada Federalka ah ee KM ee hadda jirta oo la dhisay 2004tii.
Sidaas darteed, waxaa xukuumudu aaminsan tahay daafacaadda nidaamka Federalka ah ee Dawlad Qaran ee Somaliya, oo wax ka hooseeya dadkeenu marnaba aqbali karayn.

Xiriirka Puntland iyo Dawladda Federaalka ahi waxuu ku dhisnaan doonaa nidaamka Federaalka ah ee hadda kala dhiman oo dhameystirmidoona marka ay soo dhismaan maamullo Puntland oo kale ah oo ku wada howlgala Xeer Federal ah oo ay si buuxda Puntland uga hawlgasho diyaarintiisa si ay u ilaashato daneheeda ku saleysan awood qeybsiga. Taasi waxay tahay inaan cid dibedda ka ah maamulka Puntland aysan ku matali doonin marnaba diyaarinta xeerkaas.
Middaas oo ay hadda dhacday in diyaarinta Xeerka Federalka ah ay DFKM iyadu iskeed ugu magacawday dad aan maamulka Puntland soo dirsan oo aan u aragno inay ilaalinayaan oo keliya danaha Dawladda Federalka KM.

Waa muhiim, waana siyaasadda xukuumadda in aan kula dhaqanno Dawladaha aan deriska ka nahay xagga berriga iyo xagga baddaba siyaasad ku saleysan is- xurmeyn, deris wanaag iyo wax-wada-qabsi ku aadan danaha naga dhexeeya oo ay ka mid yihiin isdhaafsiga ganacsiga iyo adkeynta amniga.

Waxaan iyadana dardar gelineynaa xiriirka wadashaqeynta aan la leenahay Beesha Calaamka, ha ahaadeen deeq bixiyayaasha (donors) ama hey'adaha kale oo calamiga ah (UN agencies and INGOs) si ay si buuxda uga hawlgalaan degaanka Puntland mar labaad, iyadoo la sugi doono haddi Alle idmo amaankooda. Taasi waxay fududeyneysa in dib loo bilaabo mashaaricdii kala go'day iyo kuwa cusubba.

## 2. AMNIGA:

Amnigu waa asaaska nolosha adamaha ama noolaha oo dhan. Waxaana muhiim aha inaan xoogeenna oo dhan saarno, dawlad iyo shacabba,

sugidiisa si wadajir, loogu wada hawlgalo melmarintiisa. Taas oo ah gundhigga siyasadda amniga ee xukumadaan. Haddaba, waxaa xukumaddan ka go'an:

- Sugidda iyo xojinta amniga dalka oo dhinac walba ah; sida difaaca xuduudaha DGPL iyo xojinta amniga gudaha, la dagaalanka burcad badeedka, afduubka berriga iyo tahriibta, si loo yareeyo dhibaatada dadka loo gaysanayo, nabadeynta beelaha, daryeelka iyo ilaalinta deegaanka.

- Adkeynta midnimada iyo amniga DGPL iyo soo celinta qeybaha hadda maqan, sida ugu dhaqsaha badan, iyadoo la adeegsanayo qorshe cad oo laga baaraandegay oo tala wadaag ah.

- Helidda ciidan TIRAKOOBAN oo dhab ah, lana arki karo, oo aan aheyn kuwa waraaqaha mushaarka keliya ku qoran (jooge maqane). Waxaa xukuumaddu durba ku tallaabsatay magacaabid iyo hawlgalka guddi nabadgeliyo oo madaxbannaan (independent security commission) oo loo xilsaaray tirakoobka, diiwangelinta iyo dib-u-habeynta ciidamada Drawishta, Poliska iyo Asluubta. Tirakoobkani wuxuu ka mid yahay tallaabooyinka Xukumaddu ku talagashan tahay inay ku saxdo ammaanka iyo dhaqaalahaba. Waxaa looga golleyahay in la helo ciidan kooban oo la bixinkaro mushaarkiisa iyo kharashyaadkiisa kale, dabadeedna la tababari karo, si loo helo ciidan taya leh oo hanankara nabadgeliyada dalka.

## 3. DHAQAALAHA:

Sal-u-dhigidda iyo hurumarinta dhaqaalaha Dawlad Goboleedka Puntland waa arrin muhiim ah. Dhaqaaleheenu wuxuu ku salaysanaan doonaa:

- dhiiri gelinta suuqa xorta ah oo dar dar gelinaya maalgelinta lahaanshaha gaarka ah (private sector);
- dakhliga dawliga ah (Public sector revenue), oo aan hadda is bixin karin;
- dhaqaalaha hay'adaha caalamig ah ka soo gala dalka oo hadda mashaariicdii oo dhan istaagtay ammaan darro darteed.

Waxay xukuumadani fulin doontaa, haddii Alle idmo:

- In la helo miisaaniyad isu dheeli tiran, oo kharashku uusan dakhliga ka badnayn, lana balaariyo ilaha dakhliga dawladda, dakhliga baaqdana la soo xereeyo, si kor loogu qaado mushahaarooyinka, iyadoo la eexinayo kor u qaadidda maciishadda hoosaysa ee dadwaynaha. Haddaba, waxaa durbadiiba Xukumaddu ku tallabsatay in la tirakoobo shaqaalaha iyo ciidamada Dawladda, si loo ogaado inta dhab ahaan ka howlgasha hey'ad walba oo dawli ah, dabdeena la jaangooyo inta wasaarad ama hey'ad waliba u bahaan tahay. Tasi waxay wax weyn ka tareysaa tayenta shaqada la qabanayo iyo awood u helidda bixinta musharooyinka.
- Inay dar dar geliso suuqa xorta ah, si loo dhiiri geliyo maalgashiga debedda, loona helo horumar dhaqaale oo shaqo abuurid leh.
- Inay xukuumaddu la dirirto, xakamaysana, sicir bararka iyo lacagaha been abuurka ah oo dalka la soo geliyo, ama lagu sameyn jiray gudihiisa.
- In la dhiiri geliyo horumarka khayraadka dabiiciga ah ee beeraha, iyadoo biyo marcenada waawayn ee dalka looga faa'ideysanayo maalgalinta mashaariicda beeraha.
- In si xawli ah loogu hawl galo badbaadinta deegaanka oo ay faro kulul ku hayaan cashiimaysiga, dhuxul shidida, boholaha, qashinka magaalooyinka iyo wasakhda biyo mareenada.
- In hay'adaha caalamiga ah lagu dhiiri geliyo inay dalka dib ugu soo noqdaan iyagoo amaankooda la sugayo si mashaariicdii baaqatay iyo kuwa cusub loo bilaabo.
- In xukuumaddu ku dadaasho inay tartiib tartiib u buuxiso farqiga dhaqaale (Economic gap) oo ay hadda buuxiyaan hay'adaha caalamig ah, si looga kaaftoomo ku tiirsanaantooda.
- In la soo nooleeyo qorshihii shanta sano oo la dhamaystiray, si loogaga qaybtamo barnaamijka dib u dhiska iyo horumarinta Somalia oo loo yaqaan (Reconstruction and Devolvement Plan for Somalia).

## 4. ARRIMHA BULSHADA:

Horumarka bulshadu waa sababta dawladiba u dhisantahay, taas oo xil ka saaran yahay in ay xal u hesho dhibaatooyinka hortaagan daryeelka caafimaadka iyo hurumarinta waxbarashada bulshada. Xukuumadu waxay qorshe ka samayndoontaa arrimaha waxbarashada iyo adeega caafimaadka asaasiga ah ee reer miyaga (Rural integrated primary education service and health care). Xukuumadu waxaa kale oo ay muhiim u aragtaa in ay ku talaabsato:

- hagaajinta adeegyada bulshada; waxaa xukuumadani hirgalinaysaa qaab habaysan oo ay u wada hawl galaan dhinacyada (different sectors) kala duwan ee wadaaga horumarinta adeegyadaas, sida xukuumada, hay'adaha dadweynaha, kuwa caalamiga ah iyo xirfadlayaasha sare.

- u gogol xaaridda xiriir dabacsan oo wanaagsan oo wasaaraduhu kula shaqeeyaan, hay'adaha caalamiga ah ee ku hawllan in ay u adeegaan bulshadeena. Xukuumaddu waxay xil iska saaraysaa adkeynta nabadgelyadooda.

- Gaarsinta adeegyada muhim ka ah deegamada ka fog wadada dheer ee isku xirta magaaloyinka waa weyn.

## 5. HESHIISYADII XUKUMADDII HORE GASHAY:

Sida aad la wada socotaan waxaa jiray heshiisyo horey loo galay, khilaafna ka jiray, xagga Xukuumada, Golaha Wakiilada iyo cabasho ka imanaysay dadweyne. Heshiisyadaas Xukumaddii hore ayaa la gashaya shirkado ajnebi ah iyo kuwa wadani ah. Mabd'a ahaan waa aqoonsanahay heshiisyadaas, hase yeeshe, dib ayaan u eegidoonaa iyadoo la waafajinayo danaha dadkeena iyo shuruucda Puntland.

## 6. DARYEELKA DEGAANKA:

Waxaan nahay bulsho weligeedba nolol ahaan ku tiirsanayd kheyraadka debiciiga ah ee dalkeena, sida xoolaha , daaqa, biyaha, kallunka, ugaarta, dhirta iwm. Sidaas darted daryeelka degaanku wuxuu xukumaddan u leeyahay mudnaanta koowaad, waxaana loo

sameeyay Wasaarad gaar ah oo ka hawlgaasha degaanka. Waxaana taas ugu wacan muhiimada daryeelka degganka oo dunida oo dhami hadda u soo jeesatay daryeelkiisa (Environmental protection is a global issue).

Waxaa xukuumada ka go'an taaba gelinta hanaan wanaagsan oo lagu ilaaliyo arrimaha degaanka oo hadii aynaan wax ka qaban dhibaatada deegaanka, sida waxyellada caafimaad, xaalufinta dhulka, burburka doxooyinka boholaha noqday, dabargoyinta kheyraadka badda, ugaarta iyo qashinka iyo sunta lagu shubo biyamareenada iyo badahaba.

Wabilaahi Towfiiq

Dr. Cabdiraxmaan Max'ed Maxamuud (Farole)
Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Puntland